



Department of Public Safety Driver and Vehicle Services

Shuruudaha Dukumentiyada Aqoonsiga RASMIGA ah (REAL ID)

2 Abriil, 2025

MA U DIYAARSANTAHAY KAARKA REAL ID?

Dhaqan-gelinta sharciga federaalka ee REAL ID waxay bilaaban doontaa May 7, 2025.

Starting Laga bilaabo May 7, 2025, dadka reer Minnesota ee da'doodu tahay 18 sano ama ka weyn waxay u baahan doonaan mid ka mid ah dukumentiyada hoos ku qoran si ay:

- REAL ID oo ah laysanka darawalnimo ama kaarka aqoonsiga (ID card), ama
 - Laysanka darawalnimo ama kaarka aqoonsiga ee la kordhiyay ama
 - Dukumentii kale oo waafaqsan sharciga REAL ID sida: Baasaboorto Mareykanka ah oo ansax ah, Baasaboorto sharci ah oo waddan kale soo saaray, Kaarka degaanshaha joogtada ah ee aan dhicin, ama Dukumentii shaqo oggolaanaya oo aan dhicin
- Booqo [tsa.gov/real-id](https://www.tsa.gov/real-id) si aad u aragto liiska dhameystiran.



Si aad u hesho kaarka darawalnimada ama kaarka aqoonsiga ee REAL ID, waxaad u baahan doontaa:



Beddelka Magaca

Magaca ku qoran dukumentiga aad keeneysa waa inuu la mid yahay magaca ku qoran codsigaaga.

Haddii magacyadu aysan is waafaqsanayn, waxaad u baahan doontaa caddeyn rasmi ah oo muujinaysa beddel kasta oo magac ah laga bilaabo dhalashada ilaa maanta.

Tusaalooyinka caddeymaha la aqbalo ee beddelka magaca waxaa ka mid ah nuqullo rasmi ah oo ka mid ah:

- Shahaadada guurka
- Go'aanka furriinka ama kala dirista guurka ee muujinaya beddelka magaca
- Go'aanka korsashada
- Go'aan maxkamadeed oo rasmi ah oo lagu beddelay magaca

Noocyada Dukumentiyada

Dukumentiyada aad soo bandhigeysa waa in ay yihiin kuwa asalka ah (original). DVS ma aqbasho dukumentiyada hoos ku xusan:

- Nuqullo la koobiye
- Sawirro la iska qaaday
- Nuqullo la fakis gareeyay
- Sawirro dijitaal ah oo ku jira telefoon gacanta ama qalab kale oo elektaroonig ah
- Dukumentiyada lagu dahaadhay caag



Wax dheeraad ah ka baro
drive.mn.gov

Horay u codso oo horay u xaqiiji • Booqo drive.mn.gov • Waa bog si fudud looga gali karo telefoonka gacanta

Waqtigaaga badbaadi adigoo horay uga codsanaya oo ka xaqiijinaya dukumentiyada REAL ID khadka tooska ah ee drive.mn.gov.

- Soo geli dukumentiyada adigoo adeegsanaya codsiga khadka tooska ah ee ku habboon telefoonka gacanta.
- Shaqaalaha DVS waxay hubin doonaan in dukumentiyada aad soo gelisay ay ku filan yihiin si lagu siiyo REAL ID.
- Keen dukumentiyada asalka ah ee la xaqiijiyay xafiiska laysanka darawalnimada si aad u dhammaystirto howshaada.
- Waxaad heli doontaa REAL ID-gaaga 7 ilaa 10 maalmood oo shaqo gudahood kadib booqashadaada xafiiska.



Dhammaan dukumentiyada waa in la xaqiijiyaa ka hor inta aan la aqbalin.

CADDEYNATA AQOONSIGA IYO TAARIIKHDA DHALASHADA – HAL DUKUMENTI OO KELIYA AYAAD U BAAHAN TAHAY	
• Laysanka darawalnimo, oggolaanshaha barashada, ama kaarka aqoonsiga ee waafaqsan REAL ID, kaas oo aan ahayn mid ku meel gaar ah ama xilli xaddidan leh, kana ansax ah ama dhacay muddo aan ka badnayn 5 sano • Shahaadada dhalashada Mareykanka oo rasmi ah • Baasaboora Mareykanka ah oo aan dhicin (ama kaarka baasaboorka) • Warbixinta dhalashada dibedda oo ay bixisay Waaxda Arrimaha Dibadda ee Mareykanka • Shahaadada Dhalashada (Form N-550 ama N-570) • Shahaadada Muwaadinimada (Form N-560 ama N-561) • Kaarka deganaanshaha joogtada ah ee aan dhicin (Form I-551)* • Baasaboora waddan shisheeye oo aan dhicin oo leh shaambad I-551 oo ku meel gaar ah (Form I-94/I-94A) oo leh sawirka qofka*	• Baasaboora shisheeye oo aan dhicin ama baasaboora aan la aqoonsaneyn ama kiisaska oggolaanshaha laga dhaafay (DS-232) oo wata shaambad I-551 ku meel gaar ah oo aan dhicin kuna taal fiisaha socdaalka ee akhris-mashiin leh (MRIV) • Dukumentii oggolaanshaha shaqo oo aan dhicin (Form I-766)* • Baasaboora shisheeye oo ansax ah oo aan dhicin, kuna dhegan fiiso Mareykanka ah oo ansax ah oo aan dhicin, waxaana weheliya Form I-94 oo muujinaya gelitaanka ugu dambeeyay ee codsada ○ Haddii Form I-94 lagu qoray “DS,” markaas waxaa sidoo kale loo baahan yahay mid ka mid ah dukumentiyada soo socda: Form F1, Form I-20, Form DS-2019, ama Form I-551
LAMBARKA AQOONSIGA BULSHADA (SOCIAL SECURITY NUMBER) – OGOOW LAMBARKAAGA OO DHAMEYSTIRAN	
Fiiro gaar ah: Waxaa laga yaabaa in loo baahdo dukumentiyada dheeraad ah oo muujinaya in aanad u fasaxnayn inaad ka shaqeyso Mareykanka, si loo xaqiijiyay inaad u qalmin Lambarka Aqoonsiga Bulshada (Social Security Number).	
CADDEYNATA DEGANAANSHAHADA MINNESOTA – LABO DUKUMENTI OO KALA DUWAN AYAAD U BAAHAN TAHAY**	
MAGACA IYO CINWAANKA WAA IN AY LA MID YIHIIN KUWA KU QORAN CODSIGA – LAGUMA AQBALO SANDUUQYADA BOOSTADA	
• Laysanka darawalnimada Minnesota, oggolaanshaha barashada, ama kaarka aqoonsiga oo ansax ah oo aan dhicin • Bogga bayaanka caymiska ama kaarka caymiska ee hadda jira (health, baabuur, guri, ama kirayste) • Warqadda canshuur celinta dakhliga ee federaalka ama gobolka – sannadkii canshuureedkii ugu dambeeyay ee la gudbiyay • Bayaan canshuurta hantida ee Minnesota (sanadkan ama kii hore) AMA bayaanka la soo jeediyay ee canshuurta hantida (sanadka hadda socda) ○ Waa in cinwaanka ku qoran faahfaahinta hantida iyo cinwaanka boostada ay isla yihiin • Shahaadada lahaanshaha baabuurka ee Minnesota • Heshiiskii hantida ama cinwaanka guriga la iska diwaan geliyay ee deganaanshaha hadda • Dukumentiyada amaahda guri ee la xiriira guriga ugu weyn ee uu qofku deggan yahay • Ruqsad xirfadeed oo aan dhicin oo laga bixiyay Minnesota (tusaale: kalkaalisada ama qurxinta timaha) • Kaarka Adeegga Ikhtiyaariga ah ee Milateriga • Amarrada milateriga ee wali ansax ah xilliga codsiga ○ Waa in ay ku jiraan foomka DD-2058 • Ruqsad sharci ah oo laga bixiyay sida waafaqsan xeerarka cayaaraha iyo kalluumaysiga	<u>Dukumentiyada soo socda waa inaysan ka weynayn 12 bilood:</u> • Biilka adeegyada guri ama amarka rakibidda adeeg ○ Adeegyada waxaa ka mid ah: internet, kabel, taleefan, telefoon gacanta, koronto, gaas, qashinka, biyaha, shidaalka la keeno • Warbixin bangi ama maaliyadeed oo Mareykanka ah oo leh lambarka koontada oo laga saaray (kaliya mid ka mid ah waa la aqbalaa): ○ Warqadda koontada bangiga ○ Warqadda kaarka deynta ama debit-ka ○ Warqadda koontada sarifka ○ Warqadda koontada suuqa lacagta ○ Warqadda koontada kaydka caafimaadka ○ Warqadda koontada hawlgaabka • Heshiiska kirada ee deganaanshaha ugu weyn ee codsada ○ Waa in uu muujiyo cinwaanka iyo saxiixyada • Warqad mushahar (pay stub) oo muujinaysa magaca iyo cinwaanka shaqo-bixiyaha • Warqadda faa'iidada caymiska shaqo la'aanta ee Minnesota • Warqad ka timid xarun daryeel ee la diiwaangeliyay oo hoos timaada qaybaha sharciyada 144.50 ilaa 144.56 • Warqadda abaalmarinta kaalmada dakhliga dheeraadka ah
<u>Dukumentiyada soo socda waa inaysan ka weynayn 90 maalmood :</u>	
• Qoraal rasmi ah oo caddeynaya deganaansho (Affidavit of Residence) loogu talagalay dadka ku nool guri kooxeed, nidaam nololeed wadajir ah, iskaashi guriyeed, ama urur diimeed. • Warqad ka timid xarunta la deggan yahay ee dadka la caawiyo ama guriga daryeelka dadka waayeelka ah	
<u>Dukumentiyada soo socda waa inaysan jiritaankooda ka badnayn 180 maalmood:</u>	
• Nuqul shahaado rasmi ah oo ka yimid dugsiga sare ee Mareykanka • Nuqul rasmi ah oo shahaado ah oo ka timid kulliyad ama jaamacad ku taal Minnesota. • Warbixin kooban oo rasmi ah oo ardaynimo oo ka timid dugsiga sare ee Mareykanka	

**Fiiro gaar ah: Haddii aad ka yar tahay 18 sano, hal dukumentii oo caddeynaya deganaansho waxaa laga aqbali karaa waalidka ama ilaaliyaha haddii uu cinwaanku la mid yahay kan ku qoran dukumentiga aad adigu keentay. Waalidka/ilaaliyaha waa inuu sidoo kale joogiyaa xafiiska markaad tagto si uu u caddeeyo in uu yahay waalidkaaga/ilaaliyahaaga sharci ah, isla markaana aad degan tahay cinwaankaas.

Dukumentiga I-797 ayaa loo baahan yahay si loogu caddeeyo kordhinta: haddii muddada ansaxnimada si toos ah loogu kordhiyo Wasaaradda Amniga Gudaha ee Mareykanka (U.S. Department of Homeland Security), waxaa loo tixgeliyaa mid aan dhacayn (unexpired), xitaa haddii taariikhda dhacitaanku ku qoran tahay.